

Dhexdhexaadintu Waa Shaqaysaa (Mediation Works)

“Dhexdhexaadintu waxay kuu badbaadisaa wakhti iyo lacag waxayna kuu ogolaataa in aad si firfircoon uga qayb qaadato xalinta dhibaato aad qabto.”

-Garsoore Stanoch

“Waa hab fiican oo wax lagaga qabto wixii la isku hayo iyadoo ay kula tahay in aad arrinta adigu hogaaminayso.”

-Dacwad ka qayb qaate

“Waxay ku siisaa fursad aad arrimaha kaga xaajooto jawi aan culays badani ku saarayn.”

- Dacwad ka qayb qaate

“Fekrad qaali ah iyo wadda fiican oo aad kaga nabad gasho kharaj dheeraad ah iyo muran & qaylo.”

-Dacwad ka qayb qaate

“Si aad u fiican bay kaaga caawinaysaa in si nadaam ah lagu xalliyo is-afgaranwaaga.”

-Dacwad ka qayb qaate



Fourth Judicial District
Hennepin County Conciliation Court
Room 306 Minneapolis City Hall
350 South 5th Street
Minneapolis, Minnesota 55415-0926
612-348-2713

Booqo boggayaga shabakadda:
<http://www.courts.state.mn.us/districts/fourth>

Tixgeli

DEXDHEXAADIN

Inta aadan dacwada

ka diiwaan gelin

Maxkamadda

dhexdhexaadinta ee

Hennepin County



Degaabka afraad ee

Maxkamadda

Degmada

Maxkamadda dhexdhexaadina ee degaanka afraad ee degmada Hennepin Waxay kugu dhiirigelinaysaa in aad adeegsato Dhexdhexaadin si aad heshiis uga gaartaan is-af-garanwaagiina.

Faahfaahinta Dhexdhexaadinta

Marka wax la dhexdhexaadinaayo waxaad la kulmaysaa dhinaca kale (cidda aad is-haysaan) iyo dhexdhexaadiye. Ujeedada kulanku waa in la isku dayo in heshiis aad gaartaan adiga iyo dhinaca kale ee is-afgaranwaagu idinka dhexeeyo. Dhexdhexaadiyuhu ma aha garsoore go'aanna ka gaari maayo dacwadiina, laakiin wuxuu ku caawinayaa dhinacyada is haya sidii ay xal u gaari lahaayeen.

Waxaad la xiriiri kartaa labada barnaamij ee qoran midkood ama qof kale oo wax dhexdhexaadiya ee aad adinku doorateen.

Faa'idooyinka Dhexdhexaadintu waa:

Xalka oo si siman looga qayb qaato

Kharaj yar ama kharaj la'aan

Degdeg oo dacwadu u dhamaato

Dhexdhexaadi maalmihii, maqribkii ama Sabti iyo Axad/shaqo ka baaqan meysid

Kulanka waxaa lagu qabannayaa xaafaddaada

Walaac iyo wareer yari

Aan ahayn wax sharciyaysan

Tusaaleyaal is-afgaranwaa oo adeegsan karo dhexdhexaadinta waa:

Ganacsi

Heshiisyo/kunturaado

Dayn bixiyayaal iyo dayn qaatayaal

Khasaare gaaray hanti

Looshaqeeya/Shaqaaale

Kireeye/Kirayste

BARNAAMIJYADA

BARNAAMIJKA **DHEXDHEXAADINTA** **MINNEAPOLIS**

Wuxuu u adeegaa Minneapolis iyo St. Anthony

Lambarka talefoonka: 612-822-9883

Saacadaha:
Isniin-jimce 9:00 subaxnimo - 5:00 galabnimo

BARNAAMIJKA **DHEXDHEXAADINTA** **WOQOYIGA HENNEPIN**

Wuxuu u adeegaa Woqooyi iyo Woqooyi-galbeed ee Hennepin County

Lambarka talefoonka: 763-561-0033

Saacadaha:
Isniin-jimce 8:30 subaxnimo - 4:30 galabnimo
